Maine Department of Education

**Warbixinta Ardayga ee Gaarka ah ee 2025**

**Qiimaynta Sannadka Socota ee Maine (Maine Through Year Assessment)**

**PAULSON, ALICIA**
**Lambarka Aqoonsiga (ID):** 123456789
**Fasalka:** 06
**Iskuulka:** ABILENE MIDDLENE SCHOOL
**Degmada:** PLEASANT VALLEY USD

## Maxay tahay warbixintani?

Warbixintani waxay macluumaad kooban ka bixinaysaa natiijada ardaygaaga ee qiimaynta tacliimeed ee gobolka, oo ah Qiimaynta Sannadka Socota ee Maine (Maine Through Year Assessment). Qiimaynta Sannadka Socota ee Maine (Maine Through Year Assessment) waxay ku salaysan tahay Halbeegyada Guud ee Aasaasiga ah ee Gobolka.

## Maxay tahay Qiimaynta Sannadka Socota ee Maine (Maine Through Year Assessment)?

Qiimaynta Sannadka Socota ee Maine (Maine Through Year Assessment) waxay diiradda saaraysaa filashooyinka muhimka ah ee heerarka fasalada laga filayo ee ku saleysan Halbeegyada Guud ee Aasaasiga ah ee Gobolka ee Akhrinta iyo Xisaabta. Qiimaynta Sannadka Socota ee Maine (Maine Through Year Assessment) waxaa looga baahan yahay dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadweynaha ee Maine ee ku jira fasalada 3 ilaa 8 iyo sannadka 2aad ee dugsiga sare.

## Muxuu ilmahaygu u marayaa Qiimaynta Sannadka Socota ee Maine (Maine Through Year Assessment)?

Barayaasha ayaa natiijooyinka ardayda u adeegsada waxbarida, u helida taageero ardayda, iyo inay qoysaska la wadaagaan macluumaadka ku saabsan guulaha tacliimeed ee ay ardaydu gaaraan.

> ⚠ Si loo abuuro faham si buuxda u dhammaystiran oo ku saabsan waxa uu ardaygaagu yaqaano iyo waxa uu qaban karo iyadoo lala barbar dhigayo halbeegyada guud ee laga doonayo fasalkaas macluumaadka laga helo warbixintan waa in lala adeegsado ilo dheeraad ah, sida qiimaynta dugsiga iyo qiimaynta waxbarasho ee fasalka dhexdiisa. Tixgelinta arrimahaasi oo dhan ayaa sawir dhammaystiran kaa siin doona xirfada ardaygaaga.

## Heerarka Guusha

| Buundo Waxooga Ka Hooseeya Filashoyinka Gobolka | Buundo Ka HoosaysaFilashoyinka Gobolka | Buundo U-dhiganta FilashadaGobolka | Buundo Ka Sarraysa Filashada Gobolka |
|---|---|---|---|
| Qiimayntani, ardayda ka guul gaarta heerkani waxay muujiyaan faham kooban oo dhanka aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah heerkan waxbarasho, sida lagu qeexay Halbeegyada Guud ee Aasaasiga ah ee Gobolka. | Qiimayntani, ardayda heerkan gaarsiisan waxay muujinayaan faham xaddidan oo hooseya oo dhanka aqoonta iyo xirfadahalagama maarmaanka u ah heerarkan, sida ku cad Halbeegyada Guud ee Aasaasiga ah ee Gobolka. | Qiimayntani, ardayda ka guul gaarta heerkani waxay muujiyaan aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah heerkan waxbarasho, sida lagu qeexay Halbeegyada Guud ee Aasaasiga ah ee Gobolka. | Qiimayntani, ardayda ka guul gaarta heerkani waxay muujiyaan faham sare oo dhanka aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah heerkan waxbarasho, sida lagu qeexay Halbeegyada Guud ee Aasaasiga ah ee Gobolka. |

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxa uu samayn karo ardayga dhigta heer kasta oo waxbarasho booqo https://www.maine.gov/doe/assessment/achievement ama iskaan garee koodhka QR.

## Waaqabadka Guud ee Ardayga

Dhibcaha Wax Akhrinta ee Ardayga

1504*
Buundo U-dhiganta Filashada Gobolka




Dhibcaha Xisaabta ee Ardayga

1590*
Buundo Ka Sarraysa Filashada Gobolka




**Haddii mar kale laga qaado imtixaan iyadoo ay jiraan xaalado kuwii hore la mid ah, waxaan filaynaa in dhibcaha ardaygu uu heli doono ay noqon doonaan dhibco u dhow kuwii hore ee lagu muujiyay* ⊢⋯⊣